

Soo Bandhigida Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa"

Sibtambar 25, 2024 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Dawlada Alberta waxay ka caawinaysaa dadka reer Alberta inay gacanta ku dhigaan ikhtiyaaradooda korantada iyo waxayna ka ilaalinaysaa bixiyayaasha kharashaadka adeegyada guriyeed ee Alberta sare u kaca qiimaha korontada.

"Alberta waxay leedahay suuq koronto oo kuwa kale ka wanaagsan oo gaar ah, kaas oo siiya dadka reer Alberta awooda ay ku doortaan bixiyaha tamarta ugu fiican, qorshe, iyo ikhtiyaarka lacag bixinta ee sida ugu wanaagsan ugu habboon baahiyahooda. Macaamiishu waxay tamartooda ka iibsan karaan in ka badan 50 tafaariiqle oo wanaagsan, iyaga oo dooranaya qandaraasyo qiime go'an ama kuwo isbedbedelaya.

Dadka reer Alberta ee aan saxiixin qandaraas wanaagsan waxaa si toos ah loogu diwaan galiyaa Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" ee adeeg bixiyahooda maxaliga ah, kaas oo waagii hore u janjeeray inuu ka qaalis yahay kana isbedbedal badan yahay ikhtiyaarada wanaagsan.

Dawladda Alberta waxay qaadaysaa tallaabo ay ku ilaalinayso bixiyayaasha kharashaadka adeegyada guryaha ee Alberta hoosna ugu dhigayso biilasha adeegyada guriyeed iyada oo ka caawinaysa macaamiisha in si wanaagsan loogu sheego ikhtiyaaradooda tamarta. Xeerar iyo sharci cusub ayaa lagu wadaa inay dhaqan galaan Janaayo 1, 2025, si dadka reer Alberta looga caawiyo inay si fiican u fahmaan ikhtiyaaradooda tamarta oo loogu dhiirigeliyo inay helaan qiimaha ugu habboon ee daboolaya baahidooda. Iyada oo la raacayo *Xeerka Wax ka Beddelka Sharciga Qiime-jabnaanta Adeegyada Guryaha, 2024*, qiimaha korantada ee caadiga ah waxaa laga beddelayaa magaca ah Regulated Rate Option (RRO) waxana loo beddelayaa Rate of Last Resort (ROLR). Baddalidda magaca ayaa si fiican uga tarjumaya dabecadda qiimaha ay macaamiishu bixinayaan waana qayb ka mid ah dadaallada wacyigelinta

macaamiisha ee socda.

"Biilka adeegyada guryaha ayaa samayn kara ama jebin kara miisaaniyad adag marka shilin waliba tirsan yahay. Dawladdeenu waxay siinaysaa dadka reer Alberta qalabka loo baahan yahay si ay gacan uga geysato badbaadinta wax badan oo lacagtooda sida adag ku soo galay ah oo ay ka dhigaan kharashaadkooda billaha ah mid la sii saadaalin karo, iyada oo laga ilaalinayo kuwa ugu nugul sicir bararka degdegga ah."

Nathan Neudorf, Wasiirka Qiime-jabnaanta iyo Adeegyada Guryaha

Si loo hubiyo in dadka reer Alberta si fiican loogu wargaliyo ikhtiyaaradooda qiimaha korantada, dawladda Alberta waxay sidoo kale soo bandhigtay shuruud xaqiijinta qiimaha ah. Qareenka Macaamiisha Adeegyada Guryaha, oo hoos yimaadda Wasaaradda Qiime-jabnaanta iyo Adeegyada Guryaha, waxa uu la xiriiri doonaa dhammaan macaamiisha ku jirta Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" 90-kii maalmoodba mar si uu u xaqiijiyo inay jeclaan lahaayeen inay ku sii jiraan Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" oo uguna dhiirrigeliyo inay sahamiyaan ikhtiyaaradooda. Bixiyeyaasha Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" waxaa sidoo kale looga baahan doonaa inay si cad ugu muujiyaan biilasha macaamiisha inay ku jiraan Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa", u sheegaan macaamiisha ikhtiyaaradooda suuqa tafaariiqda ee wanaagsan, oo ay cusbooneysiyaan xeerarka iyo shuruudaha heshiisyada adeegooda.

Si kastaba ha ahaatee, dhammaan dadka reer Alberta ma awoodaan inay saxeexaan qandaraas wanaagsan. Meelaha miyiga qaarkood, Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" waxa laga yaabaa inay tahay ikhtiyaarka keliya ee macaamiishu ku heli karaan koronto. Amaah xumo ama dhibaatooyin kale oo maaliyadeed ayaa sidoo kale laga yaabaa inay ka mamnuucaan dadka reer Alberta, badanaa waayeelka iyo dadka kale ee nugul, inay saxiixaan qandaraas wanaagsan. Hadda, Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" waa ay ku kala duwan yihiin biluhu iyada oo lagu saleynayo qiimayaasha suuqa waxaana ansixiya Guddiga Adeegyada Guriyed ee Alberta, ma aha dawladda. Si macaamiishan looga ilaaliyo sicir bararka kediska ah ee isbedbedelaya, Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" waxaa la dejin doonaa labadii sanaba mar waxaana kaliya la bedeli karaa ugu badnaan boqolkiiba 10 inta u dhaxaysa muddooyinka ah 2-sano ee bilaabmaya Janaayo 1, 2025. Iyada oo loo marayo shuruucdan cusub, dawladda Alberta waxay uga dhigaysaa Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" mid sugan oo la saadaalin karo dadka reer Alberta ee aan awoodin inay saxeexaan qandaraas wanaagsan.

Dadka reer Alberta waxa lagu dhiirrigelinayaa inay sahamiyaan ikhtiyaaradooda oo ay helaan

qiimaha ugu wanaagsan ee ku habboon baahiyahooda. Sannadkii hore, tobanaan kun oo qoys ayaa ka guuray Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" una guuray heshiisyo wanaagsan si ay u helaan ikhtiyaar ka qiime jaban. Dadka reer Alberta ee raadinaya in laga caawiyo biilashooda adeegyada guryaha ama wajahaya khilaaf kala dhexeeya adeeg bixiyahooda waa in ay kala xidhiidhaan Qareenka Macaamiisha Adeegyada Guryaha lambarka 310-4855 ama ay u maraan websaytkooda.

Xaqiiqooyinka kooban

- Dadka reer Alberta waxay leeyihiin saddex ikhtiyaar marka ay iibsanaayaan korontadooda iyo adeegyadooda guryaha ee gaasta dabiiciga ah: Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa", qandaraas wanaagsan oo leh qiime isbedbedela, ama qandaraas wanaagsan oo leh qiime go'an.
 - Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa" waxa ansixiyay Guddiga Adeegyada guryaha ee Alberta (AUC) oo ma go'aamiso dawladdu. Baro wax badan oo ku saabsan habka dejinta sicirka iyo qiimayaasha hadda adiga oo u maraya websaytka AUC.
- Ku dhawaad 26 boqolkiiba macaamiisha guryaha waxay iibsadaan koronto iyaga oo u maraya Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa".
- Ku dhawaad 29 boqolkiiba macaamiisha ganacsiga ee xaqa u leh iyo 40 boqolkiiba macaamiisha beeruhu waxay iibsadaan koronto iyaga oo u maraya Rate of Last Resort "Qiimaha Fursadda ugu Dambaysa".

Macluumaad la xiriira

- [Qareenka Macaamiisha Adeegyada guryaha](#)
- [Guddiga Adeegyada Guryaha ee Alberta](#)

Wararka la xiriira

- [Qiimeyaasha korontada waxa hoos u dhigay kala badh xeerarka suuqa cusub \(Sibtambar 5, 2024\)](#)
- [Korjoogteynta korontadu waxay taageertaa dib-u-habaynta suuqa korontada ee Alberta \(Ogosto 5, 2024\)](#)
- [Ka hortagga kororka qiimaha korontada \(Juun 26, 2024\)](#)
- [Ka dhigista biilasha tamarta kuwo qiime jaban \(Abriil 22, 2024\)](#)
- [Ka dhigista korontada mid qiime jaban \(Abriil 18, 2024\)](#)

Su'aalaha warbaahinta

Ashley M Stevenson

587-357-2141

Xoghayaha Warfaafinta, Wasaaradda Qiime-jabnaanta iyo Adeegyada Guriyeed